OhioHealth
Rehabilitation Hospital
In partnership with Select Medical

Cutubka	**Maamulka**		**Lambarka Aqoonsiga Caymiska:**	**RH-AD-122-L**	
Magaca Aqoonsiga Caymiska	**Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale (oo ay ku jirto Daryeel Bilaash ah)**				
Taariikhda La Soo Saaray	**02/23/2016**	**Taariikhda Dib u eegista lagu sameeyay** **5/12/2020**	**Ansixin** **5/12/2020**	***Agaasimaha Guud***	

Nuqulada daabacan waxaa loogu talagalay tixraac kaliya. Fadlan tixraac nuqulka elegtarooniga ah midkii ugu danbeeyay.

Shuruudaha/Tixraacyada Maamulka:
Siyaasaddani waxay waafaqaysaa Xeerka Dakhliga Canshuuraha Gudaha Qaybta 501(r) iyo Xeerarka Maamulka Qasnada ee la xidhiidha.

Kormeerka iyo Mas'uuliyadda:
Madaxa Fulinta OhioHealth Rehabilitation Hospital ayaa mas'uul ka ah inuu dib u eego, wax ka beddelid ku sameeyo, cusboonaysiiyo, oo hawlgeliyo siyaasaddan si loo ilaaliyo u hoggaansanaanta maamulka ama shuruudaha kale.

Waa mas'uuliyadda isbitaalka, waaxda iyo qolada maamulka inay hirgeliyaan siyaasadda.

OhioHealth
Rehabilitation Hospital
In partnership with Select Medical

Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale

Siyaasadda OhioHealth Rehabilitation Hospital (OHRH) waa in ay siiso Daryeel Caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah bukaanada iyada oo aan loo eegin jinsiyadda, caqiidada, ama awooda inuu qofku iska bixin karo. Bukaanada aan haysan habab ay ku bixiyaan adeegyada ay siiso OHRH waxa ay codsan karaan kaalmo dhaqaale, taas oo lagu abaalmarin doono iyada oo la raacayo shuruudaha hoos ku xusan. Shuruudaha u-qalmitaanka kaalmada dhaqaale ee waafaqsan Siyaasaddan waxaa loogu talagalay in lagu hubiyo in OHRH ay lahaan doonto ilo dhaqaale si ay u bixiso daryeelka la siiyo bukaannada qaba baahida dhaqaale ee ugu weyn.

I. Gundhig

A. OHRH waxay ku bixisaa isbitaalka adeegyada baxnaaninta bukaan-jiifka iyo kuwa bukaan-socodka ee looga shaqeeyo loona maareeyo si guud ahaan waafaqsan shuruudaha OhioHealth Foundation sida ku qeexan qaybta 501(c)(3) ee Xeerka Dakhliga Canshuuraha Gudaha iyo machadyada samafalka ee hoos yimaada sharciga gobolka.

B. OHRH waxaa ka go'an inay bixiso Daryeel Caafimaad ahaan Lagama maarmaan ah. "Daryeel Caafimaad ahaan Lagama maarmaan ah" waxaa la siiyaa bukaanada iyada oo aan loo eegin jinsiyadda, caqiidada, ama awoodda ay lacagta ku bixin karaan.

C. Ka-faa'iideystayaasha muhiimka ah ee Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale waxaa loogu talagalay inay ahaadaan bukaanno aan caymis ku jirin oona Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ahi aanu ka badnayn 100% ee Tilmaamaha Dakhliga Saboolnimada Federaalka ee ay daabacdo waqti ka waqti Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka oo dhaqan galaysa taariikhda la bixiyo adeegga abaal-marinaha kaalmada dhaqaale ee hoos timaada Siyaasaddan (FPG). Kaalmada dhaqaale ee ku salaysan dakhliga waxa laga yaabaa inay heli karaan dadka aan caymiska kujirin iyo bukaanada kale qaarkood ee haysta Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ah gaarayana *ilaa* 250% FPG ee adeegyada bukaan-jiifka iyo *ilaa* 400% FPG ee adeegyada bukaan-socodka. Bukaanada ay la soo deristay dhibaato dhaqaale ama dhibaatooyin shakhsi ama xaalado caafimaad oo gaar ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inay u qalmaan kaalmo. Marnaba ma ma jirto xaalad uu bukaanka u qalmo kaalmada dhaqaale ee hoos timaada Xeerkan lagu dalaci doono wax ka badan inta guud ahaan looga soo qortay daryeelka noocaas ah.

II. Qeexitaano

"Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ah" waxaa ku jira lacagaha cayiman iyo mushaharka iyo dakhliga aan cayimnayn oo ay ku jiraan masruufka xaaska iyo masruufka ilmaha; sooshiyaal sekiyuuritiga, shaqo la'aanta, iyo dheefaha magdhawga shaqaalaha, hawlgabka, dulsaarka ama dakhliga kiraynta qoyska.

"Codsiga" waxaa loola jeedaa habka codsashada sida waafaqsan Siyaasaddan, oo ay ku jiraan midkood (a) adigoo buuxinaya codsiga kaalmada dhaqaale ee OHRH shakhsi ahaan, ama telefoonka iyadoo uu ku caawinayo wakiil ama (b) adoo boostada ugu soo diraya ama keenaya nuqul warqad ah oo dhammaystiran oo ah Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha OHRH dhismaha OHRH ama goobta bukaan-socod ee OHRH.

"CBO" macneheedu waa Xarunta Dhexe ee Biilasha iyo Lacag soo Ururinta.

"Bukaan-jiifka OHRH" macneheedu waa OhioHealth Rehabilitation Hospital oo ku yaal 1087 Dennison Avenue, Columbus, Ohio 43201.

"Bukaan-socod OHRH" waxaa loola jeedaa rugaha bixiya daaweynta bukaan-socod ee badan ee ku taxan Lifaaqa C.

"Qoyska" waxaa loola jeedaa bukaanka, xaaska bukaanka (iyada oo aan loo eegin meesha ay xaasku ku nooshahay) iyo dhammaan carruurta bukaanka dhalay ama kuwa uu korsaday ee da'doodu ka yar tahay siddeed iyo toban jir eena la nool bukaanka. Haddii uu bukaanku ka yar yahay siddeed iyo toban jir, qoysku waa in ay ku jiraan bukaanka, waalidka dhalay ama korsaday bukaanka (iyada oo aan loo eegin meesha uu waalidku ku nool yihiin), iyo dhammaan waalidka dhalay carruurta ama soo korsada ee hoos yimaada da'da siddeed iyo toban jirka ah oo ku nool guriga.

“FPG” waxa loola jeedaa Tilmaamaha Dakhliga Saboolnimada Federaalka ee ay daabacdo waqti ka waqti Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka oo dhaqan galeysa taariikhda adeegga.

"HCAP" waa Barnaamijka Hubinta Daryeelka Isbitaalka Ohio. HCAP waa nooca Ohio ee barnaamijka Isbitaalka Wadaagga ah ee federaalka looga baahan yahay. HCAP waxay siisaa maalgelinta isbitaalada ka dhaafa kharash bixinta adeegyada heerka isbitaalka ee aasaasiga ah ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah bukaanada u qalma.

"Bukaannada ceymiska kujira" waa shakhsiyaad leh caymis caafimaad oo dawladeed ama mid gaar ah.

"Daryeelka Caafimad ahaan lagama Maarmaanka ah" macnaheedu waa adeegyadan macquulka ah oo lagama maarmaanka u ah in la ogaado lana siiyo ka hortag, xanuun baabiin, daaweyn ama wax ka qabashada xaalad jireed ama dhimir iyadoo la raacayo heerarka si xirfadaysan loo aqoonsan yahay ee daryeelka caafimaadka guud ahaan la aqbalo wakhtiga adeegyada ayaa la bixiyaa. Daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah kuma jiraan dawooyinka loo qoray qofka bukaan-socodka ah.

"Siyaasadda" macnaheedu waa Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale sida hadda jirta.

"Degane" waxaa loola jeedaa qof si sharci ah u dagan dalka Mareykanka oo si sharci ah u degenaa gobolka adeega caafimaadka lagu raadsado ugu yaraan lix (6) bilood wakhtiga adeegyada la bixiyo ama sida kale leh ujeedada ah in la sii jiro gobolka laga raadsado adeegyada caafimaadka ugu yaraan lix (6) bilood ka dib marka adeegyada la bixiyay.

"Bukaannada aan caymiska kujirin" waa shakhsiyaad: (i) aan lahayn caymis caafimaad oo dawladeed ama mid gaar ah; (ii) dheefahooda caymis la wada isticmaalay; ama (iii) dheefaha caymiskoodu aanay daboolin Daryeelka Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka ah u ah bukaanku uuna raadsanayo.

III. Cilaaqaadka kala dhexeeya Siyaasadaha Kale

A . Siyaasada HCAP. Ka qaybgalayaasha OHRH eena ka tirsan HCAP.Dhammaan adeegyada HCAP waxaa maamula Siyaasadda OHRH HCAP, mana jiraan wax Siyaasaddan loogu talagalay ama waa in loo tarjumaa si loo xaddido kaalmada qofka u qalma HCAP sida hoos timaada HCAP. HCAP waxay dabooshaa oo kaliya adeegyada heerka iisbitaalka aasaasiga ah, caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.

IV. Shuruudaha U-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale

Bukaannada buuxiya shuruudaha hoos ku qoran waxay xaq u leeyihiin kaalmada lagu sifeeyay Qaybta VII ee hoos timaada Siyaasaddan.

Bukaan daryeelka ka raadsada qaybta bukaan-jiifka OHRH ama qaybta bukaan-socod waxay xaq u leeyihiin kaalmada dhaqaale ee hoos timaada Siyaasaddan mid ka mid ah saddexda qaybood ee soo socda ee u-qalmitaanka maaliyadeed:

A. Kaalmada Dhaqaale ee ku salaysan Dakhliga-

- Bukaanada aan Caymiska Kujirin eena Dakhliga Qoyskooda Sannadlaha ahna ka badnayn 250% FPG-ga loogu talagalay adeegyada bukaan-jiifka iyo 400% FPG ee loogu talagaay adeegyada bukaan-socodka,

- Kuwaas oo u raadinaya Daryeelka Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka u ah adeegyada isbitaalka bukaan-jiifka, iyo

- Kuwaas oo ah dad degan Ohio.

B. Siyaabo Dheeraad ah oo Lagu Heli karo Kaalmada - Bukaanka aan si kale ugu qalmin kaalmada maaliyadeed ee hoos timaada Siyaasaddan laakiin aan awoodin in uu iska bixiyo kharashka Daryeelka Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka ah waxaa laga yaabaa inuu ka raadsado kaalmo xaaladaha soo socda:

1. Xaaladaha Gaarka- Bukaannada u sheega in ay ku jiraan xaalad adag oo shakhsi ama dhaqaale (ay ku jirto jirro aan dhammaad lahayn ama xaalad

caafimaad oo kale ahna mid masiibo ah).

2. Duruufaha Caafimaadka Gaarka ah- Bukaanka doonaya daawaynta oo ay bixin karaan shaqaalaha caafimaadka OHRH ama ka faa'iidaysan doona adeegyada caafimaadka joogtada ah ee OHRH si loo sii wado daryeelka.

Codsiyada kaalmada ay sabab u tahay duruufo gaar ah ama Xaalado Caafimaad oo Gaar ah ayaa loo qiimayn doonaa si kiis-kiis ah.

C. Baarista Medicaid. Bukaannada aan ceymiska kujirin ee doonaya daryeelka OHRH waxaa laga yaabaa in uu la soo xiriiro wakiil si uu u go'aamiyo in ay u qalmi karaan Medicaid iyo in kale. Bukaanka aan caymiska kujirin waa in ay la shaqeeyaan nidaamka u qalmashada Medicaid si ay ugu qalmaan kaalmada maaliyadeed ee hoos timaada Siyaasaddan.

V. Qaabka loo Codsado

A. Kaalmada Dhaqaale ee ku salaysan Dakhliga.

(i) Bukaan kasta oo raadsada kaalmada dhaqaale ee ku salaysan dakhliga wakhti kasta oo ku jira jadwalka ama habka biilasha ayaa buuxin kara codsiga kaalmada maaliyadeed waxaana la waydiin doonaa inuu bixiyo macluumaadka Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ah muddada saddexda bilood ah isla markiiba ka hor taariikhda dib u eegista xaq u yeelashada. Adeegyada xaqiijinta dakhliga kooxda saddexaad waxa loo isticmaali karaa caddayn ahaan Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ah. Codsiga kaalmada dhaqaale waxa laga yaabaa in laga helo meelahayaga Ogolaanshaha, xagga dambe ee bayaankaaga daabacan, ama maareeyaha kiiska ee OHRH.

(**i**) Haddii uu jiro farqi u dhexeeya labada ilood oo macluumaad, wakiilka OHRH ee Maareynta Kiiska ama Xafiiska Ganacsiga ayaa codsan kara macluumaad dheeraad ah si loo taageero Dakhliga Qoyska ee Sannadlaha ah.

B. Duruufaha Gaarka ah

OHRH waxay bilaabi doontaa Codsiga Bukaan kasta oo lagu aqoonsado OHRH inuu galay ama uu halis ugu jiro inuu galo dheelitirnaan sare ama ka warbixinaya dhibaato shakhsi ama dhaqaale oo xad dhaaf ah. OHRH waxay bukaanka ka ururin doontaa macluumaadka ku saabsan duruufaha dhaqaale iyo dhibaatooyinka shakhsi ahaaneed. Go'aannada waxaa sameeya Maareeyaha CBO ee OHRH iyadoo uu hoos imaanayo Maamulaha Guud. Bukaanka waxaa lagu ogeysiin doonaa qoraal go'aanka kama dambaysta ah.

C. Daruufaha Caafimaadka Gaarka ah

OHRH waxay bilaabi doontaa Codsiga bukaan kasta oo la aqoonsaday inta lagu jiro jadwalka ama habka gelitaanka inuu qabo daruufo caafimaad oo gaar ah oo suurtagal ah wakiilkuna wuxuu talo ka codsan doonaa dhakhtarka bukaan-jiifka ee OHRH ama daaweeyaha bukaan-socodka kaasoo bixinaya ama bixin doona daaweynta ama daryeelka haddii bukaanku uu u baahan yahay daawaynta oo ay bixin karaan oo kaliya shaqaalaha caafimaadka ama dhakhtarka OHRH, ama uu ka faa'iidaysan doona adeegyada caafimaadka joogtada ah ama mida baxnaaninta ee ay bixiso OHRH si ay u sii wado daryeelka. Go'aaminta xaaladaha caafimaad ee gaarka ah waxaa sameeya dhakhtarka daaweeynaya iyo/ama Agaasimaha Caafimaadka. Bukaanka waxaa lagu ogeysiin doonaa qoraal haddii aysan u qalmin kaalmada dhaqaale sababo la xiriira daruufo caafimaad oo gaar ah awgood.

D. Codsiyada aan Dhamaystirnayn ama Maqan.

Bukaanadu waxaa la ogeysiin doonaa macluumaadka ka maqan Codsiga Kaalmada Dhaqaale waxaana la siin doonaa fursad macquul ah oo ay ku keenaan. Haddii macluumaadka maqan aan la keenin, OHRH waxa laga yaabaa inay isticmaasho xogta xaqajiinta daqliga qolo saddexaad si ay u buuxiso Codsiga Kaalmada Dhaqaale.

VI. Habka Go'aaminta U-qalmitaanka

A. Wareysi Dhaqaale. Wakiilka OHRH ee ka socda CBO wuxuu isku dayi doonaa inuu taleefoon kula soo xiriiro dhammaan Bukaannada aan Caymiska kujirin ee aan si mala awaal ah ugu qalmin kaalmada dhaqaale wakhtiga jadwalaynta. Lataliyaha maaliyadeed waxa uu waydiin doonaa macluumaadka, oo ay ku jiraan tirada qoyska, ilaha dakhliga qoyska iyo daruuf kasta oo kale oo dhaqaale ama kharash bixin ah oo taageerta u-qalmitaanka ku xusan Siyaasadan oo u buuxin doona Codsiga si waafaqsan. Waqtiga ballanta ama marka la ogolaado, bukaanada waxaa la waydiin doonaa inay soo booqdaan wakiilka OHRH oo ay saxiixaan codsiga kaalmada dhaqaale.

B. Codsiyada. Codsi kasta oo kaalmo maaliyadeed ah, ha ahaado mid qof ahaan loo buuxiyey, ha ahaado mid keenay ama boosta lagu soo diray, waxa loo gudbin doonaa wakiilka OHRH si loo qiimeeyo loogana shaqeeyo.

C. Go'aaminta U-qalmitaanka. Wakiilka OHRH ee ka socda CBO ayaa qiimeyn doona kana shaqayn doona dhammaan Codsiyada Kaalmada Dhaqaale. Bukaanka waxaa lagu ogeysiin doonaa warqad go'aanka u-qalmitaanka. Bukaanada u qalma in ka yar 100% kaalmada dhaqaale waxay heli doonaan warqad ay ku qoran tahay boqolkiiba inta la daboolay.

VII. Saldhigga Xisaabinta Lacagaha Lagu Dallacay Bukaanka, Baaxadda, iyo Muddada Kaalmada Dhaqaale

Bukaanada u qalma abaal-marinaha kaalmada dhaqaale ee ku salaysan daqliga sida hoos timaada Siyaasadda waxay heli doonaan kaalmo iyadoo loo eegayo shuruudaha dakhliga ee soo socda:

- Haddii dakhliga qoyskaaga sanadlaha ah uu ka gaaro 100% FPG adeegyada bukaan-jiifka ama 150% FPG adeegyada bukaan-socodka, waxaad heli doontaa daryeel bilaash ah.

- Haddii dakhliga qoyskaaga sannadkii uu u dhexeeyo 101% iyo 250% ee FPG, waxaad heli doontaa daryeel laga dhimay kharashyada guud ilaa "qadarka guud ahaan lagu soo dallaco" (AGB) Bukaanada Caymiska kujira ee adeegyada bukaan-jiifka OHRH.

- Haddii dakhliga qoyskaaga sannadkii uu u dhexeeyo 151% iyo 400% ee FPG, waxaad heli doontaa daryeel laga dhimay kharashyada guud ilaa "qadarka guud ahaan lagu soo dallaco" (AGB) Bukaanada Caymiska kujira ee adeegyada bukaan-socodka OHRH. Eeg Lifaaqa D.
- Qiimo dhimis = 100% - 57%

Dadka ah bukaan-jiifka iyo kuwa bukaan-socoda ee ku jira OHRH waxay doorteen inay isticmaalaan Habka Dib u mulicsashada kaas oo "qadarka guud ahaan lagu soo

dallacay" (ABG) ay ku salaysan tahay kharashka guud ee ujrada-adeegga Medicare sida ku cad Xeerka Dakhliga Canshuuraha Gudaha (IRC) §501(r) (5) iyo xeerar kasta ama hagitaan kale oo ay bixiso Waaxda Maaliyadda ee Mareykanka ama Adeegga Dakhliga Canshuuraha ee qeexaya shuruudaas. OHRH, iyadoo la raacayo qawaaniinta lagu dabaqi karo, waxa laga yaabaa inay isu beddesho habka loo xisaabiyo AGB mustaqbalka.

Marka OHRH ay go'aamiso in bukaanku u qalmo kaalmada dhaqaale ee ku salaysan dakhliga, go'aankaas wuxuu ansaxayaa sagaashan (90) maalmood laga bilaabo taariikhda dib u eegista xaq u yeelashada. Sagaashan (90) maalmood ka dib, bukaanku waxa laga yaabaa inuu buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee cusub si uu u raadsado kaalmo dhaqaale oo dheeraad ah.

Bukaanada loo oggolaaday kaalmo leh isku dheelitirnaanta musiibada, dhammaan baaqiga waa la dabooli doonaa.

Bukaanada loo oggolaaday kaalmada sida hoos timaada Duruufaha Caafimaad Reeban ama Gaarka ah, bukaanka waxa lagu dabooli doonaa Xeerkan 100% in laga bixiyo kharashyada aan la bixin iyo kharashyada dhammaan daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee la bixiyo inta lagu jiro muddada lagama maarmaanka ah si loo dhamaystiro daawaynta ama daryeelka sida ay noqon karto waxaa go'aamiyay dhakhtarka OHRH ee daawaynaya. Bukaanka xaaladiisa dhaqaale isbedeshay wuxuu codsan karaa in dib loo qiimeeyo wakhti kasta.

VIII. Go'aaminta U-qalmitaanka Kaalmada Dhaqaale Kahor intaan la qaadin Talaaboda Lacag bixin La'aanta

A. Biilasha iyo Dadaallada Macquulka ah ee lagu Go'aaminayo Xaq u yeelashada Kaalmada Dhaqaale. OHRH waxay doonaysaa inay go'aamiso in bukaanku u qalmo kaalmo sida hoos timaada Siyaasaddan ka hor ama wakhtiga oggolaanshaha ama adeegga. Haddii bukaan aan la go'aamin in uu u qalmo kaalmada dhaqaale ka hor inta aan lagaa saarin ama adeegga, OHRH waxay ku soo dalici doontaa daryeelka. Haddii bukaanku caymis ku jiro, OHRH waxay ku soo dallici doontaa diwaanka kharashyada la galay qolada caymis siisay bukaanka. Markuu ka soo boxo go'aan caymis bixiyaha bukaanka, wixii ka haray masuuliyada bukaanka waxaa si toos ah loogu soo dalacayaa bukaanka. Haddii bukaanku uusan caymiska ku jirin, OHRH waxay si toos ugu soo dallici doontaa bukaanka kharashyada la galay. Bukaanada ayaa heli doona taxane ah ilaa bayaano afar biil oo xiriir ah muddo 120 maalmood ah oo ka bilaabmaya ka dib marka bukaan-socodka laga saaro oo la geeyo ciwaanka ku qoran diiwaanka bukaanka. Kaliya bukaanada leh hadhaaga aan la bixin ayaa heli doona bayaanka biilasha. Bayaanada biilasha waxaa ka mid ah qoraal Kooban oo ku qoran Luuqad waadhax ah iyo sida loo codsado kaalmada dhaqaale. Dadaallada macquulka ah ee lagu go'aaminayo u-qalmitaanka waxaa ka mid ah: ogaysiinta Siyaasada ay OHRH u dirto bukaanka marka la ogolaado iyo xiriir qoraal iyo hadal ah oo lala yeesho bukaanka ee ku saabsan biilka bukaanka, dadaal lagu ogeysiiyo qofka taleefanka ee ku saabsan Siyaasadda iyo habka loo codsado kaalmada ugu yaraan 30

maalmood ka hor inta aan la qaadin tallaabo lagu bilaabayo dacwad kasta, iyo jawaab qoraal ah oo ku saabsan codsi kasta oo kaalmo dhaqaale ah oo lagu caawinayo siyaasaddan oo lagu soo gudbiyo 240 maalmood gudahood ee bayaanka biilasha ugu horreeya ee la xidhiidha hadhaaga aan la bixin ama, haddii gadaal dambe, taariikhda taas oo hay'ad dayn ururin oo u shaqaynaysa OHRH ay ku soo celiso hadhaaga aan la bixin isbitaalka.

B. Tallaabooyinka Uruurinta Hadhaaga Aan La Bixin. Haddii bukaanku lagu leeyahay hadhaaga OHRH oo muuqda ka dib ilaa bayaan afar biil oo la soo diray 120 maalmood gudahood, hadhaaga bukaanka waxaa loo gudbin doonaa hay'ad dayn ururin ah oo matalaysa OHRH taas oo raadin doonta lacag bixinta. OHRH iyo wakaaladeeda dayn ururinta uma warramaan xafiisyada deymaha mana daba galaan mushaharka ama falalka dayn ururinta ee la midka ah. Wakaaladaha dayn ururinta ee matalaya OHRH waxay awood u leeyihiin inay ku raadiyaan ururinta ilaa 18 bilood laga bilaabo marka hadhaaga loo diro wakaalada dayn ururinta. Bukaanku waxa laga yaabaa in uu codsado caawimo maaliyadeed sida waafaqsan Siyaasadan xittaa ka dib marka hadhaaga aan la bixin bukaanka loo gudbiyo wakaalada dayn ururinta. Ka dib markii ay ka soo wareegto ugu yaraan 120 maalmood bayaanka biilasha ka dib markii ugu horeysay ee laga soo saaray isbitaalka lana siiyay bayaanka biilasha muujinaya kharashyada aan wali la bixin, iyo xaalad kasta, OHRH waxay ku daba gali kartaa dayn ururinta iyada oo loo marayo dacwad marka bukaanku lagu leeyahay hadhaa uusana kala shaqayn doonin codsiyada macluumaadka ama lacag bixinta OHRH ama wakaalada dayn ururinta ee u shaqaynaysa isbitaalka.

Marnaba ma dhacayso in Daryeelka Lagama Maarmaanka ah dib loo dhigi doono ama loo diidi doono bukaanka ka hor inta aan la samayn dadaallo macquul ah si loo go'aamiyo in bukaanku u qalmo kaalmada dhaqaale iyo in kale. Marka la joogo OHRH, bukaanka aan caymiska kujirin ee doonaya inuu jadwal u sameeysto adeegyo cusub oo aan loo malayn inuu u qalmo kaalmada dhaqaale waxaa la soo xiriiri doono wakiil kaas oo ogeysiin doona bukaanka Siyaasadda oo ka caawin doona bukaanka inuu bilaabo Codsiga kaalmada dhaqaale haddii la codsado.

C. Dib u eegis iyo Ansixin. Wakiilka CBO ee OHRH ayaa awood u leh inuu dib u eego uuna go'aamiyo in dadaallo macquul ah la sameeyay si loo qiimeeyo haddii Bukaanku u qalmo kaalmo marka loo eego Siyaasadda si tallaabooyinka dayn ururinta aan caadiga ahayn ay u bilaabmaan marka ay dhacdo inaan hadhaaga la bixin.

IX. Dhakhaatiirta aan hoos iman Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee OHRH

Adeegyada qaarkood waxa daboola dhakhaatiirta OHRH waxaana daboosha OhioHealth Rehabilitation Hospital FAP.

Dhakhaatiirta ka shaqeysa OHRH ee *aanan* hoos imaan FAP waxaa lagu aqoonsaday **lifaaqa B, Liiska Adeeg Bixiyaha**, magac ahaan.

X. Tallaabooyinka lagu Shaacinayo Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale

ee OHRH

OHRH waxaa ka go'an inay si balaadhan ugu shaaciso Siyaasaddan bulshooyinka ay u adeegto OHRH. Si taas loo gaaro, OHRH waxay qaadi doontaa tillaabooyinka soo socda si ay u hubiso in xubnaha bulshadaa ee ay u adeegayo xaruntan ay ogaadaan Siyaasadda oo ay galaangal u yeeshaan Siyaasadda.

A. OHRH waxay ka dhigi doontaa nuqul ka mid ah Siyaasadda ay hadda diyaarka u tahay bulshada iyadoo ku dhejin doonta qoraal kooban oo ku qoran luuqad waadhax ah kuna saabsan siyaasadda boggeeda internetka oo ay la socoto nuqul la soo dejisan karo oo ah Codsiga Siyaasadda iyo Kaalmada Dhaqaale oo ay la socdaan tilmaamaha soo dejinta nuqullada. Wax lacag ah layskagama qaado in la soo dejisto nuqul ka mid ah Siyaasadda, qoraal kooban oo ku qoran Luuqad Waadhax ah ama Codsiga Kaalmada Dhaqaale.

B. OHRH waxay bixin doontaa qoraan kooban oo ku qoran luqad waadhax oona ku saabsan Siyaasadda wakhtiga oggolaanshaha waxaana heli doona bukaannada iyo qoysaskooda, oo ay ku jirto qoraal kooban oo ku qoran luqad waadhax ah oona ku saabsan Siyaasadda si loo siiyo qaansheegasho kasta oo daboolaya qaddarka adeegyada lagu dallacay.

C. Wakiilada OHRH ee ka socda Maamulka Dacwada ama CBO waxay samayn doonaan qoraal kooban oo ku qoran luuqad waadhax ah oona ku saabsan Siyaasada oo ay heli karaan dhammaan bukaanada ay la kulmaan waxayna siin doonaan qof kasta oo ka codsada nuqulja Siyaasadda.

D. OHRH waxay ku dari doontaa sharaxaad ku saabsan sida loo helo nuqul ama macluumaadka ku saabsan Siyaasadda ee uga warbixinaya dheefata bulshada ee loo sameeyo bulshada guud ahaan.

E. OHRH waxay ka dhigi doontaa macluumaadka ku saabsan siyaasaddeeda mid ay heli karaan

hay'adaha dawliga ah ee ku habboon iyo hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn ee ka shaqeeya caafimaadka dadweynaha ee goobaha ay adeegga ka bixiso OHRH.

LIFAAQA B

Liiska Adeeg
Bixiyaha OHRH
wuxuu dhaqan
galayaa 5/12/2020

Adeeg bixiyeyaasha ay daboosho Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee OHRH kuwaas oona Bixiya Daryeel Caafimaad ahaan Lagama Maarmaan ka ah OHRH

Post-Acute Physicians of Ohio, PLLC
Physical Medicine & Associates
MedOne, Inc.
Denison Medical Group, Inc.
Emal Sherzai, MD, Inc.

Adeeg bixiyeyaasha aysan daboolin Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee OHRH

Marka laga reebo sida kor ku taxan, ma jiraan takhaatiir kale ama kooxo takhaatiir ah, ama adeeg bixiyeyaasha kale ee xirfadlayaasha ah (sida kalkaaliyayaasha takhaatiirta ama kalkaaliyayaasha diwaangashan) waxaa daboola Siyaasaddan Kaalmada Dhaqaale.

LIFAAQA C

Goobaha Rugta Bukaan-
socodka ee OHRH Waxay
dhaqan galayaan 5/12/2020

(Fiiri lifaaqa khariidadda rugaha caafimaadka)

LIFAAQA D

Jadwalka Daryeelka La dhimay ee Bukaan-socodka OHRH Waxay dhaqan galaysaa 5/12/2020

% Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka	Qiima dhimista Kharashka OP
150%	100%
151 - 199%	90%
200%	75%
201 – 300%	55%
301 – 400%	35%